

JAMHUURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	الْجُمْهُورِيَّةُ الرَّسْمِيَّةُ لْجُمْهُورِيَّةِ صُومَالِيْلَانْد	
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA E-mail: Garyaqaankaquud@gmail.com		
Sanadka: 3aad	Cadadka: 12aad ee December	Taariikh: 03/01/2015
QIIMAHA CADADKA: SL. Sh. RUKUNKA (Subscription):		
<i>QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.</i>		

TUSMADA CADADKA

<u>QAYBTA KOWAAD:</u> XEERARKA	
BAARLAMAANKA IYO XEER	
NIDAAMIYAYAASHA:	308
<ol style="list-style-type: none"> 1) Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerkii Diiwaangelinta Codbixiyayaasha Xeer Lr.37/2007 2) Go'aanka Ansixinta Miisaaniyada Dawladda ee 2015ka 	336
<u>QAYBTA LABAAD:</u> XEER	338
NIDAAMIYAYAASHA	
IYO	339
DIKREETOYINKA	

MADAXWEYNAHA:

- 3) Cafis Madaxweyne,
XEER MADAXWEYNE Lr: 0412/122014 341
- 4) Dhaqan-galka Miisaaniyad
Sanadeedka 2015-ka
XEER MADAXWEYNE Lr: 0414/122014 343

QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOYINKA, 344

WAREEGTOOYINKA, AMARADA & XEER

NIDAAMIYAYAASHA 345

WASIIRADA, IWM

- 5) Wareegto Wasiir, Wasiirka 347
Wasaarada Beeraha 349

QAYBTA AFRAAD: AMARADA & 351

GO'AANADA MAAMUL

- 6) Qaraar Baafin Rafcaansane; 352
Maxkamada Rafcaanka Gobolka
Maroodi-Jeex
- 7) Baafin Rafcaansane; 353
Maxkamada Rafcaanka Gobolka
Maroodi-Jeex 355
- 8) Amar Xayiraad Guri Fooq ah
Maxkamadda Degmada Hargeysa 356
- 9) Amar Xayiraad Guri
Maxkamadda Gobolka Hargeysa
- 10) Naado Xaraash Guri
Maxkamadda Gobolka Hargeysa 358
- 11) Caddeyn Diiwaan Gelin Shirikada
Gadhyare Construction and contracting
Company, 359
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud

12) Diiwaan Gelin Shirikada East Africa Service Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	360
13) Diiwaan Gelin Shirikada Smart Construction & Contracting, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	362
14) Diiwaan Gelin TVga Kalsan, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	
15) Diiwaan Gelin Shirikada Savana Energy Company <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	363
16) Caddeyn Diiwaan Gelin Shirikada Nur Yare Group LTD, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	365
17) Diiwaan Gelin Shirikada Al-Haashimi General Trading Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	366
18) Caddeyn Diiwaan Gelin Shirikada Nuura Construction Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	
19) Diiwaan Gelin Shirikada Seven-Stars Construction and consulting Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	
20) Diiwaan Gelin Shirikada Sahal Transportation and logistics, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	
21) Caddeyn Diiwaan Gelin Shirikada GSK Group Somaliland Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	
22) Diiwaan Gelin Shirikada Denhan International, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	
<u>QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA</u>	
23) SOOMA BIXIN	



QAYBTA KOWAAD
XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER
NIDAAMIYAYAASHA:



REPUBLIC OF  SOMALILAND
THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2867/122014

DATE: 04/12/14

XEER MADAXWEYNE Lr:0413/122014

**Dhaqan-galka Wax-ka-bedelka iyo
Kaabista Xeerka Diiwaangelinta
Codbixiyayaasha Xeer Lr. 37/2007**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad Dastuurka
Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee
Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada
Go'aan Lr.GW/G/KF-
27642/2014 ee ku

taariikhaysan 06/12/2014
ee ay ku ansixiyeen Wax-
ka-bedelka iyo Kaabista
Xeerka Diiwaangelinta
Codbixiyayaasha Xeer Lr.
37/2007

Wuxuu soo saaray

Xeerkan oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Wax-ka-
bedelka iyo Kaabista Xeerka Diiwaangelinta
Codbixiyayaasha Xeer Lr. 37/2007.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head quarter hargeisa.



Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha wakiilada
Xarunta Hargeisa

Ref: Gw/G/KF-27/642/2014

Date: 06/12/2014

Go'aanka Ansixinta Wax-ka-bedelka iyo Kaabista
Xeerka Diwaan Galinta Codbixiyaasha
Xeer Lr.37/2007

- Markuu arkay:-** Qodobka 4aad Faq 1aad, 9aad faq(1) iyo 22aad faq(2) ee Dastuurka Qaranka JSL.
- Markuu arkay:-** Muhiimada ay Leedahay Diwaan galinta Muwaadinka iyo Diwaan Galinta Codbixiyaasha.
- Markuu ka Dooday:-** Nuxurka ay Xambarsantahay soo jeedinta Golaha Wakiiladda ee Wax-ka-Bedelka iyo Kaabista Xeerka Diwaan Galinta Codbixiyaasha.
- Markuu Dersay:-** Soo jeedinta Wax-ka-Bedelka iyo Kaabista ee Xeerka Diwaan Galinta Cod-Bixiyaasha Xeer Lr 37.
- Markuu Tix galiyay:-** Duruufaha la xidhiidha geedi socodka Dimuqraadiyada iyo suurto-gelinta in la helo doorasho u dhacda si caddaalad ah.
- Markuu Arkay:-** Go'aanka Ansixinta Xeer Lr 37/2007 ee Golaha Guurtida kuna taariikhaysnaa **02/12/2014.**



Markuu Arkay :-

In Guuritda Wax-ka Bedel Iyo Kaabis Ku sameyeen kuna ansixiyeen Cod dhan (52) Konton iyo laba Wax-ka-Bedelka iyo Kaabista Xeerka Diwaan-Galinta Cod-Bixiyayaasha Xeer **Lr 37 /2007**

**Markuu
U Codeeyay:-**

Ansixinta Wax-ka-Bedelka iyo Kaabista Xeerka Diwaan-Galinta Cod-Bixiyayaasha Xeer **Lr 37** ee Kal-fadhiga **26**aad fadhigiisi **9**aad taariikhduna ahayd **06/12/2014** oo ay goob joog ahaayeen **(44)** Mudane oo ka mida ah mudanayaasha Golaha Wakiilada.

WUXUU

Cod aqlabiyad ah afartan iyo laba **(39 cod)** oo gacan taag ah ku ansixiyay Wax-ka-Bedelka iyo Kaabista Xeerka Diwaan-Galinta Cod-Bixiyayaasha (Xeer **No. 37/2007**), halka uu ka diiday **(1)** Mudane, kana aamuseen **(3)** Mudane, **Gudoomiyuhuna muu codayn** sida caadada ah.

ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL



C/raxmaan Maxamed C/laahi (Cirro)
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL



JAMHUURIYADDA SOMALILAND

GOLAHA WAKIILADU

**Markuu
arkay:-**

Qodobka 4aad Faq 1aad,
9aad faq (1) iyo 22aad faq(2)
ee Dastuurka Qaranka JSL.

**Markuu
arkay:-**

Muhiimada ay Leedahay
Diwaan galinta Muwaadinka
iyo Diwaan Galinta Cod-
bixiyayaasha.

**Markuu
ka Dooday:-**


Nuxurka ay
Xambarsantahay soo
jeedinta Golaha
Xukuumada ee Wax-ka-
Bedelka iyo Kaabista Xeerka
Diwaan Galinta
Codbiyayaasha.

**Markuu
Dersay:-**

Soo jeedinta Wax-ka-
Bedelka Iyo Kaabista ee
Xeerka Diwaan Galinta Cod-
Bixiyayaasha Xeer Lr 37.

Markuu
Tix galiyay:-

Duruufeheena la xidhiidha
geedi socodka
Dimuqraadiyada iyo suuro
galinta in la helo doorasho u
dhacda si cadaalad ah.



WUXUU WAX-KA-BEDEL IYO KAABIS KU
SAMEEYAY MASHRUUCA
Wax-ka-bedelka iyo Kaabista Xeerka
Diiwaangelinta Codbixiyayaasha Xeer Lr.
37/2007

QAYBTA KOOWAAD
MABAADI'DA GUUD

Qodobka 1^{aad}

KAABIS IYO WAX KA BEDEL

Waa kabis iyo wax ka bedel lagu sameeyey xeerka Lr 37/2007,
xeerka diiwaangelinta codbixiyayaasha.

Qodobka 2^{aad}

ERAY-BIXINTA

Erayadan soo socda hadaan Xeerka si kale loogu sheegin waxa
looga jeedaa macnaha ku hor

Qoran:-

Muwaaddin:-

Waxaa loola jeedaa qof kasta
oo buuxiyay shuruudaha uu
tilmaamayo xeerka
jinsiyaddu Xeer Lr. 22/2002.

**Diiwaangelinta
Muwaadinka:-**

Waxaa looga jeedaa
Diiwaangelinta muwaadin
kasta oo reer Somaliland ah
oo ay sameysay Wasaaradda
Arrimaha Gudaha iyo
dawladda hoose ee
degmooyinka JSL.



Diiwaangelinta codbixiyaha

Waxa loola jeedaa
muwaadiniinta isu
diiwaageliya inay
codeeyaan xilliga
doorashooyinka qaranka
JSL

Diiwaanka:-

Waxa loola jeedaa diiwaanka
lagu qoro magacyada
codbixiyayaasha ee goob-
doorasho kasta

Diiwaanka Guud:

Waxa loola jeedaa diiwaanka
dhexe ee la dhigo xarunta
Komishanka Doorashooyinka
kaasoo lagu kaydiyo
dhammaan magacyada
codbixiyayaasha Qaranka
Somaliland

Cod-bixiye:

Waxaa loola jeedaa
muwaadin kasta oo xaq u leh
in uu wax doorto, lana doorto
islamarkaana gaadhay da'da
cod-bixinta.

**Diiwaanka Gobolka
ama Degmada:-**

Waxaa loola jeedaa
diiwaanka heer gobol ama
degmo



**Kaadhka Cod-
bixinta:-**

Waxa loola jeedaa kaadhka la
siiyo codbixiyaha marka la
diiwaan-geliyo.

**Kaadhka
Aqoonsiga: -**

Waxaa loola jeedaa kaadhka
aqoonsiga muwaaddinimo
(teesarada)

Komishanka:-

Waxaa loola jeedaa
Komishanka Doorashooyinka
Qaranka

Wakiil Xisbi:

Waxa loola jeedaa xubinta uu
xisbi u soo magacaabo in uu
wakiil uga noqdo goobaha
diiwaan-gelinta
codbixiyayaasha.

Goob-joogayaal:-

Waxa loola jeedaa
kormeerayasha caalamiga iyo
kuwa maxaliga ah ee
hubinaya habsami u socodka
doorashooyinka

Dastuur:

Waxa loola jeedaa
dastuurka Qaranka
Jamhuuriyadda Somaliland

Wasaarad:-

Waxaa looga jeedaa
Wasaaradda Arimaha
Gudaha JSL

Qodobka 3^{aad}
XADKA ku DHAQANKA



Kaabistan iyo wax ka bedelkan waxaa lagu maamulayaa Diiwaangelinta muwaadinniinta iyo diiwaangelinta codbixiyayaasha ee Qaranka Somaliland oo ay u kala xilsaaran yihiin Wasaaradda Arimaha Gudaha, dawlada hoose ee degmooyinka iyo Komishanka Doorashooyinka qaranka una kal qabsoomya siday ugu kala horeeyaan qodobkan.

Qodobka 4^{aad}
DIIWAANADA CODBIXIYEYAASHA QARANKA
SOMALILAND

1. Qaranka Somaliland waxa uu yeelanyaa diwaanka muwaadinka oo lagu qori doono muwaadinka kasta oo u dhashay Somaliland.
2. Qaranka Somaliland Waxa uu yeelan doonaa diiwaanka Codbixiyaha, Diiwaankaasi oo lagu diiwaan-gelin doono muwaaddin kasta oo xaq u leh in uu wax doorto ama la doorto, sida ku cad Dastuurka yo Xeerarka kale ee dalka.
3. Labada diiwaan ee ku xusan faqrada 1 iyo 2 waxa ay noqonayaan Dokumenti lagu kaydiyo Qalabka Kombiyuutarka iyo diiwaano oo ka kooban dhammaan xogaha laga qoro muwaaddinka marka loo diiwaan-gelinaayo muwaadin ahaan ama codbixiye ahaan.

Qodobka 5^{aad}
LA HAANSHAHA DIIWAANNADA

1. Diiwaannadu waa hanti ummadeed oo uu leeyahay qaranka JSL
2. Diiwaanka Codbixiyayaashana Xisbi kasta oo siyaasadeed waxa uu xaq u leeyahay in uu la socdo habaynta, dhaqan-gelinta, iyo daabacaadda liiska Diiwaanka.

Qodobka 6^{aad}

DADKA AY REEBAN TAHAY IN LA DIIWAANGELIYO

1. Dadka ay reeban tahay in loo diiwaan geliyo muwaadin ahaan waxa tilmaamaya xeerka jinsiyadda xeer lr 22/2002
2. Dadka ay reeban tahay in loo diiwaan geliyo codbixiye
 - (b) Muwaadinka aan xiskiisu dhamyn
 - (t) Maxaabiista Xukuman ama gar-sugayaasha ah.
 - (j) Ajnabiga dalka gudahiisa ku sugan(X) Qof aan gaadhin da'da diiwaan gelinta (aan qaan gaadh ahayn).

Qodobka 7^{aad}

Kaydinta DIIWAANGALINTA

1. Wasaarada Arrimaha Gudaha ayaa ka masuul ah kaydinta, xafidaada iyo soo saarista liiska kama dambeysta ah ee Diiwaangalinta muwaadinka.
2. Komishankuna waxa xil ka saaran yahay kaydinta, xafidaadad iyo soo saarida liiska kama dambeysta ah ee diiwaangalinta codbixiyayaasha 6 bilood gudahood ka hor maalinta doorasho kasta.

Qodobka 8^{aad}

DADKA AAN LAHAYN AWOODA SAXEEXA

Foomka Diiwaangelinta muwaadinka, qof aan lahayn awooda saxeexa wuxuu ku saxeexayaa foomka diiwaangelinta suulka gacanta bidix, haddii uu naafo ka yahayna wuxuu adeegsanayaa suulka gacanta midig, haddii uu labadaba la'yahay waxa uu adeegsanayaa mid ka mid ah faraha kale ee gacmaha, hadduu tobankaba la'yahayna waxa u saxeexaya mas'uulka diiwaangelinta, waana in arrintaa lagu qoraa foomka diiwaangelinta.

Qodobka 9^{aad}

HABKA XAFIDAADA QALABKA DIIWAANGELINTA

1. Marka ay dhammaato hawl-maalmeedka shaqo ee diiwaangelintu Dhammaan qalabka loo isticmaalay diiwaangelinta waxa lagu celinayaa Xafiiska Degmada, haddii sidaas la yeeli waayana mas'uulka diiwaangelinta ee Degmada waxa xil ka saaran yahay inuu sida ugu dhakhsaha badan ugu war-geliyo booliiska, isla markaana uu faro in mas'uulka khaladkaas ku kacay la soo qabto, loona keeno mas'uulka degmadda, haddii uu khaladku yahay mid ku yimi dhayal si ama si niyad xummo ah mas'uulka degmaddu waxa uu isla markaana Shaqada ka saarayaa mas'uulka ku kacay falkaas ama waxa lagu ciqaabaya Xeerka ciqaabta guud, iyada oo loo eegayo xaaladda iyo hadba culayska fal danbiyeedku uu leeyahay.
2. Meelaha ay jirto gaadiid xumo qalabka diiwaangelintu waxa ka mas'uul noqonaya diiwaangeliyaha oo todobaadkiiba hal mar u gudbinayaa diiwaangeliyaha degmadda, hase yeeshee mas'uulka diiwaangeliyaha ah waxa uu xil ka saaran yahay qorista iyo xafidaada diiwaanadda hawl-maalmeedka diiwaangelinta oo dhan.
3. Hawl-maalmeedka goobta diiwaangelinta waxa la bilaabaya lixda subaxnimo, waxayna dhammaanaysaa lixda galabnimo, haddii dib u dhac ku yimaadana waa in

lagu caddeeyaa warbixinta sababta keentay dib-u-dhaca, haddii dib u dhacu aanuu garawshiiyo lahayn waa in mas'uulka diiwaangelinta ee degmaddu talaabo ka qaado, sidaasna uu war bixin ugu gudbiyo mas'uuliyiinta ka saraysa, haddii ay gaadho lixda galabnimo oo ay joogaan dad aan la diiwaangelin waxa loo raacaya Xeerka Doorashooyinka, waxaana la diiwaangelinayaa dadkaas ilaa inta ay ka dhammaanayaan dadka markaa joogaa.

Qodobka 10^{aad}

HAB-QORAALKA MAGACA MUWAADINKA

Magaca muwaadinka waa in lagu qoro xuruuf la isla wada sargooyey; waana in aanay kala duwanaamin.

Qodobka 11^{aad}


SAXITAANKA XOGAHA KHALDAMA

1. Muwaadinka ku arka liiska diiwaangelinta xog khaldan oo isaga ku saabsan, waa in uu u sheego mas'uulka diiwaangelinta kuna qoro oo saxeexo foomka loogu talo galay arintan. Mas'uulkanina waa inuu sida ugu dhakhsaha badan u sameeyo sixitaan, warbixinna u gudbiyo mas'uulka diiwaanka heer qaran isagoo u sii marinaya mas'uullada heer Degmo iyo Gobol.
2. Marka ay dhammaato muddada loogu talo galay beddelka iyo sixitaanku, mas'uulka diiwaangelinta Qaranku wuxuu xog faahfaahsan ka diyaarinayaa dhammaan wixii isbeddelay, wuxuuna xogtan u gudbinayaa mas'uulka ay khusayso si loo ansixiyo loona ogolaado in isbeddeladan la geliyo Diiwaanka.

Qodobka 12^{aad}

NOOCA WARQADDA AQQOONSIGA IYO WARQADDA CODBIXINTA

Warqadda Aqoonsiga muwaadinka (National ID) ama Warqadda cod-bixintu waa in ay ka samaysan yihiin shay aan si fudud u duugoobayn ama dhammaanayn oo aan waxlaga bedelkaraynin ama la-been abuuri kareyn (laf).



Qodobka 13^{aad}

LUMISTA WARQADDA AQOONSIGA AMA WARQADDA CODBIXINTA

1. Qof kasta oo ay ka lunto ama ka xumaato Warqadda Aqoonsiga ama Warqadda cod-bixintu, waxa uu waydiisan karaa mas'uuliyiinta u xilaaran, mas'uuliyiintuna waa in ay siiyaan Warqadda Aqoonsiga ama Warqadda cod-bixineed oo cusub, oo sidata xogtii iyo tixraacii hore marka sidaas laga soo codsado, lana caddeeyo sababta lumista.
2. Qofka uu ka xumaadaa waxa uu mutaysanaya in loo bedelo marka uu keeno warqaddii xumaaday.
3. Qof kasta oo hela warqada aqoonisga muwaadinka (ID card) ama warqada codbixinta waa inuu geeyaa meesha ugu dhow Saldhig booliis ama Xarunta Dawlada Hoose.

Qodobka 14^{aad}

DHAWRISTA XOGTA MUWAADINKA IYO CODBIXINTA

Xogta Diiwaannadu waa sir u gaar ah Qaranka iyo qof kasta oo muwaaddin ah oo is-diiwaangeliyey, sidaas daraadeed:-

- 1) Sifo aan Sharciga waafaqsanayn loogama faa'iidayn karo, looma gudbin karo, loomana beddeli karo.
- 2) Qof kasta oo, sifo aan Sharci ahayn ula baxa, u bixiya ama xada waxa uu mutaysanayaa ciqaab dhan 3 illaa 5 sano oo xadhig ah.
- 3) Habka dacwada waxa loo raacayaa Xeerka Habka Ciqaabta.

- 4) Xogta Muwaadinka waxa la siin karaa hay'adaha nabadgalyada, haddii ay lagama maarmaan u tahay amniga iyo nabadgalyada guud ee qaranka iyo muwaadiniinta, waxaana lagu bixin karaa oo kaliya haddii uu sharci sidaas waajibiyo ama amar ay soo saartay Maxkamad awood u lihi.
- 5) Waxaa reebban in Xogta Muwaadiniinta iyo codbixinta loo gudbiyo dal shisheeye ah.

Qodobka 15^{aad}

QAADASHADA WAX KA BADAN HAL WARQAD AQOONSI AMA WARQADDA CODAYNTA

1. Waxaa reebban in uu Muwaaddinku qaato wax ka badan hal Warqad Aqoonsi ama Warqad Codbixineed.
2. Haddii uu Muwaaddinku si khiyaamo ah u qaato, wax uga beddelo, u been abuuro Warqad Aqoonsi ama Warqad Codbixineed iyo wax ka badan waxa uu mutaysanayaa Ciqaabta ku xusan xeerkan.

QAYBTA 2AAD

Qodobka 16^{aad}

DIWAANGELINTA MUWAADINNIMADA

Marka diiwaan-gelinta Sugidda muwaadinnimada la sammaynayo waa in la sugo Muwaadinnimada Qofka reer Somaliland ah iyadoo loo raacayo si waafaqsan Xeerka Jinsiyada 22/2002.

Qodobka 17^{aad}

SUGITAANKA MUWAADINKA

Sugitaanka muwaadinka waxaa loo raacaya sidan soo socota:

1. Qofka raba in uu is diiwaan-geliyo waxaa xaqiijinaya Suldaan, Caaqil, xubnaha laba Gole Baarlamaan, golyaasha deegaanka, Gudoomiyayaasha tuulooyinka (head tuulo), ganacsatada deegaanka, imaamka tuulada waxaana

ansixinaya Wakiilka Maxkamadda ka dib markuu sidaa ku dhaariyo xubnaha sare.

2. Marka ay sugnaato Muwaadinnimada qofka is diiwaangelinaya, waxa mas'uulka goobtu xogta muwaadinka gelinaya foomka rasmiga ah ee Diiwangelinta, wuxuuna xaq u yeelanayaa warqadda aqoonsiga.

Qodobka 18^{aad}

HAWL-GALKA DIIWAANGELINTA MUWAADINNIMADA

Bilawga hawl-galka diiwaangelinta Muwaadiniinta waxa saldhig u ah qoddobadan soo socda oo ay waajib tahay in la dhammaystiro.

1. Marka diiwaan-gelinta Warqadda Aqoonsiga la sammaynayo waa in la sugo Muwaadinnimada Qofka reer Somaliland.
2. Marka ay sugnaato Muwaadinnimada qofka is diiwaangelinayaa, waxa la gelinayaa xogtiisa form-ka rasmiga ah.
3. Waxa isla goobtaasi lagu siinaya qof kasta oo ay sugnaato muwaadinnimadiisu warqad aqoonsi.
4. Qofkasta oo ku guul-daraysta in ay xubnaha ku xusan farqada 1^{aad} ee Qodobka 17^{aad} ka hor-caddeeyaan Muwaadinnimadiisa waxa lagu war-gelinayaa in uu keeno qof la yaqaan oo hanti ma-guurta ah ku leh Deegaanka/Dalka, oo caddeeya in uu yahay muwaadin Reer Somaliland ah, kuna dammiinto hantidiisa.

Qodobka 19^{aad}

NIDAAMKA DIIWAANGELINTA MUWAADINKA

Maalin kasta inta aan la furin goobta diiwaangelinta waxaa mas'uuliyiinta Goobta ku waajib ah:-

1. In ay is-xaadirayaan, islamarkaana ay saxeexaan galabka diiwaangelinta iyagoo diiwaangelinaaya lambarka tixraaca Foom-ka Diiwaan-gelinta ee ay maalintaa ku shaqaynayaan.
2. Marka shaqo maalmeedka la soo gebagebeeyo waa in qoraal lagu cadeeyo tirada muwaaddiniinta la diiwaangeliyey maalintaa, isla markaana ay saxeexaan hawl-wadeenaddu.
3. Inay diiwaan-geliyaan dhacdooyinkii ay la kulmeen maalintaa.
4. Goobkasta oo codbixineed ayaa noqoneysa goob diiwaangalineed muwaadin.

Qodobka 20^{aad}
DHAQAN-GELINTA DIIWAANGELINTA
MUWAADINNIMADA

Iyada oo la adeegsanayo dhammaan hababka warbaahinta kala duwan ee ka jira dalka:


1. Waa in la daabaco, islamarkaana la baahiyo xilliga loo cayimay Diiwaan-gelinta Muwaadinnimada iyo dhammaan wixii xog ah ee ay muwaaddiniintu u baahan yihiin in ay ogaadaan.
2. Waxaa waajib ah in la baro islamarkaana lagu wacyi geliyo muwaaddiniinta muhiimadda ay Diiwaangelinta Muwaadinnimadu leedahay.

Qodobka 21^{aad}
FOOMKA DIIWAAN-GELINTA MUWAADINNIMADA

Foomka diiwaan-gelinta ayaa sal-dhig u noqonaya diiwaan-gelinta Warqadda Aqoonsiga Muwaadinka, waxaana lagu qorayaa ugu yaraan xogaha hoos ku xusan ee muwaadinka:-

1. Magaca muwaadinka oo afran.

2. Magaca Hooyada oo saddexan.
3. Sanadka uu dhashay iyo meesha uu ku dhashay
4. Lab ama dhedig.
5. (marital status) Xaalada Guur Xaas iyo doob
6. Saxeexa Muwaadinka ama tilmaan muujinaysa in aanu saxeexi karayn.
7. Lambarka gaarka ah ee lagu diiwaan-geliyay muwaadinka.



Qodobka 22^{aad}

XOGTA LAGU QORAYO WARQADDA AQOONSIGA

Warqadda Aqoonsiga Muwaadinnimada waxa waajib ah in ay ku qornadaan xogtan hoose:-

- 1) Magaca oo afran.
- 2) Taariikda dhalashada.
- 3) Sawirka muwaadinka.
- 4) Lambarka Warqadda aqoonsiga (ID card) .
- 5) Goobta Dhalashada.
- 6) Jinsiga (Lab ama Dhedig).
- 7) Waxa la kaydinaya
 - b) Xogta sawirka indhaha ee muwaadinka
 - t) Xogtaha sawirka faraha ee muwaadinka

Qodobka 23^{aad}

SHAQAALAHA DIIWAAN-GELINTA SUGIDDA MUWAADINNIMADA

1. Si loo dhaqan-geliyo diiwaan-gelinta muwaadinnimada, Wasaaradda Arimaha Guduhu waa in ay

shaqaaleysiisaa shaqaale khibrad iyo xirfad u leh dhaqan-gelinta diiwaan-gelinta, oo ay ka mid yihiin:-

a) Mas'uulka Diiwaanka Qaranka ee Warqadda Aqoonsiga oo mas'uul ka noqon doona maamulka Diiwaanka Warqadda Aqoonsiga, islamarkaana ah madaxa Waaxda Diiwaan-gelinta ee Warqadda Aqoonsiga oo Xarunteedu tahay Wasaaradda Arimaha Gudaha.

b) Mas'uulka Diiwaanka Warqadda Aqoonsiga ee Degmo kasta;

c) Mas'uulka Diiwaanka Warqadda Aqoonsiga ee Gobol kasta.

2. Shaqaalaha loo qaadanaayo xafiisyada kala duwan ee Diiwaan-gelinta warqadda aqoonsiga waa in ay noqdaan dad reer Somaliland ah oo ka madax-bannaan siyaasadda oo lagu soo xushay khibradda iyo aqoonta looga baahan-yahay booska ay ka shaqaynayaan.

3. Inta aan qofka la shaqaalayn, waa in la qeexo:-

a) Shuruudaha iyo xirfadaha looga baahan yahay qofka loo qaadanaayo booska.

b) Habka loo raacayo xulashada Shaqaalaha; iyo

c) Waajibaadyada shaqo ee qof kasta (boos kasta) uu ku lahaanayo geeddi-socodka hawsha Diiwaan-gelinta.

Qodobka 24^{aad}

DOORKA SHAQO EE WASAARADDA EE DIIWAANGELINTA MUWAADINNIMADA

Wasaaraddu waa in ay:-

1. Waa inay sugtaa muwaadinimadiisa qof la siinayo warqadda aqoonsiga (National ID).

2. Daabacdaa, habaysaa, dhaqan-gelisaa diiwaanka sugidda muwaadinnimada.

3. Wasaaradda Arimaha Guduhu waxay soo saaraysaa Xeer-nidaamiyayaal lagu dhaqangelinayo Diiwaangelinta Muwaadinnimada.



QAYBTA SADEXAAD

Qodobka 25^{aad}

DIWAAN-GELINTA CODBIXIYEYAASHA

1. Qofkasta oo raba in uu isu diiwaangeliyo codbixiye Doorashooyinka Qaranka (Madaxtooyada iyo Baarlamaanka) iyo Dawladaha Hoose waa in uu sitaa Warqadda Aqoonsiga Muwaadinka.
2. Hadii ay dhacdo in muwaadiniinta qaarkood ay suurto-galin waydo in ay hore u sii qaataan Wasaarada Aqoonsiga Muwaadinka, waa in Wasaarada Arrimaha Guduhu ku sugtaa Muwaadinnimadooda goobta qaadashada kaadhka codbixiyaha.

Qodobka 26^{aad}

HABKA DIIWAANGELINTA **CODBIXIYEYAASHA**

1. Doorashooyinka Qaranka waxa ka codayn kara oo keliya qof muwaaddin ah oo ku diiwaangashan Diiwaanka Codbixiyaha.
2. Liiska diiwaanka coodbixiyaha waxa soo saaraya Komishanka Doorashooyinka Qaranka laba bilood ka hor xilliga doorshada.
3. Diwaangalinta codbixiyayaasha laguma xidhi karo lacag lagu bixinaayo ama shuruud kale oo lacageed ama kharash gelinaaya codbixiyaha.
4. Muwaaddin kasta oo iska diiwaangeliya Komishanka Doorashooyinka Qaranka codbixiye si Sharciga waafaqsan waxa la raacaayo Habka

Gaarka ah ee Aqoonsiga Codbixiyaha (Unique Biometric Identification) oo ah in sawir la qaado indhaha muwaadinka.



Qodobka 27^{aad}

SHAQADA KOMISHANKA DOORASHOYINKA QARANKA

Iyada oo aan waxba loo dhimayn xilka iyo waajibaadka Komishanka Doorashooyinka Qaranka ee xeerarka kale u xil-saareen komishanku:-

1. Waxa uu dalka Somaliland ka dhaqan-gelinayaa hawsha diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha ka hor taariikhda doorashada.
2. Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa ka mas'uul ah habaynta, dhaqan-gelinta iyo daabacaadda diiwaanka codbixiyeyaasha.
3. Komishanka Doorashooyinka Qaranku wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiyayaal, Go'aamo, Habraacyo iyo Amarro lagu dhaqangelinayo Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

Qodobka 28^{aad}

KU DHAWAAQIDDA DIIWAANGELINTA CODBIXIYAYAASHA

Komishanka qaranka ayaa ku dhawaaqaya xilliga la bilaabaayo Diiwaangelinta codbixiyeyaasha marka ay tashadaan axsaabta qaranka, waxayna ku war gelin doonaan Madaxweynaha JSL.

Qodobka 29^{aad}

DHAQAN-GELINTA DIIWAAN-GELINTA CODBIXIYAYAASHA

1. Muddada ay Diiwaan-gelinta Codbixiyayaashu soconayso iyo Hab-raacaba (procedure) waxa uu Komishanka

Doorashooyinka Qaranku kusoo saarayaa Xeer-hoosaad (Regulations).

2. Komishanku isagoo adeegsanaya dhammaan hababka warbaahinta kala duwan ee ka jira dalka, waa in uu daabaco, islamarkaana baahiyo xilliga loo cayimay Diiwaan-gelinta Codbixiyayaasha iyo dhammaan wixii xog ah ee ay muwaaddiniintu u baahan yihiin in ay ogaadaan.
3. Komishanka waxaa ku waajib ah in uu baro, islamarkaana ku wacyi geliyo muwaaddiniinta muhiimadda ay Diiwaangelinta codbixiyayaashu leedahay.
4. Si arrintaa loo suurto-geliyana Komishanku waa in uu diyaariyaa barnaamijyo qayb ka ah geedi-socodka Diiwaan-gelinta oo loogu talagalay in lagu baro laguna wacyi geliyo dadwaynaha in ay isu diyaariyaan diiwaangelinta codbixiyayaasha.


Qodobka 30^{aad}

FOOMKA DIIWAAN-GELINTA CODBIXIYAYAASHA

Foomka diiwaan-gelinta codbixiyayaasha ayaa sal-dhig u noqonaya diiwaan-gelinta codbixiyayaasha, waxaana lagu qorayaa xogaha hoos ku xusan:-

1. Magaca Codbixiyaha oo afran una qoran sida uu ugu qoranyahay Warqadda Aqoonsiga.
2. Sanadka uu dhashay iyo meesha uu ku dhashay
3. Lab ama dhedig
4. Saxeexa codbixiyaha ama tilmaan muujinaysa in aanu codbixiyuhu saxeexi karayn.
5. Lambarka gaarka ah ee lagu diiwaan-geliyay codbixiyaha
6. Lambarka tix-raaca diiwaan-gelinta codbixiyaha

7. Lambarka warqadda Aqoonsiga (ID Card Number)



Qodobka 31^{aad}

XOGTA LAGU QORAYO WARQADDA CODAYNTA

Warqadda cod-bixinta waxa waajib ah in ay ku qornadaan xogtan hoose:-

1. Magaca oo afran.
2. Sawirka cod-bixiyaha
3. Lambarka warqadda aqoonsiga
4. Lambarka Tixraaca Diiwaan-gelinta Cod-bixiyaha .
5. Sanadka uu dhashay.
6. Jinsiga (Lab ama Dhedig).
7. Goobta Doorashada ee uu codbixiyuhu ka dhiibanayo codkiisa.

Qodobka 32^{aad}

SIXITAANKA IYO MURANKA DA'DA

Da,ada muwaadinka waxa lagu jaangoynayaa da,ada muwaadinka ee ku qoran warqadda aqoonsiga ee muwaadinka.

Qodobka 33^{aad}

**SHAQAALAHA DIIWAAN-GELINTA
CODBIXIYAYAASHA**

1. Si loo dhaqan-geliyo diiwaan-gelinta Codbixiyayaasha, Komishanku waa in ay shaqaaleeyaan shaqaale khibrad

iyo xirfad u leh dhaqan-gelinta diiwaan-gelinta oo ay ka mid yihiin:-

- a) Mas'uuliyiinta Diiwaanka Codbixiyayaasha oo mas'uul ka noqon doona maamulka Diiwaanka, islamarkaana ah madaxa Waaxda Diiwaan-gelinta Warqadda Codbixinta oo Xaruntiisu tahay Komishanka Doorashooyinka Qaranka;
 - b) Mas'uulka Diiwaanka codbixiyayaasha ee Goob kasta;
 - c) Mas'uulka Diiwaanka codbixiyayaasha ee Degmo kasta.
 - d) Mas'uulka Diiwaanka codbixiyayaasha ee Gobol kasta.
2. Shaqaalaha loo qaadanaayo xafiisyada kala duwan ee Diiwaan-gelinta Codbixiyayaashu waa in ay noqdaan dad reer Somaliland ah oo ka madaxbannaan siyaasadda oo lagu soo xushay khibradda iyo aqoonta looga baahan yahay booska uu ka shaqaynaayo.
3. Inta aan qofka la shaqaalayn, waa in la qeexo:-
- a) Shuruudaha iyo xirfadaha looga baahan yahay qofka loo qaadanaayo booska;
 - b) Habka loo raacayo xulashada Shaqaalaha; iyo
 - c) Waajibaadyada shaqo ee qof kasta (boos kasta) uu ku lahaanayo geeddi-socodka hawsha Diiwaan-gelinta Codbixiyayaasha.

Qodobka 34^{aad}

HABKA IYO GOOBAHA DIIWAAN-GELINTA COBIXIYAYAASHA

1. Komishanka Doorashooyinka Qaranka ayaa Xeer-hoosaad (Regulations) faah-faahsan ku soo saaraya Habka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha iyo Goobaha Diiwaangelinta ee Degmo iyo Gobol.
2. Sidoo kale waxa uu Komishanku Xeer-hoosaad kusoo saarayaa in uu Muwaaddinku farsamo ahaan iska

diiwaangelin karo goobta ama Magaalada uu joogo balse uu doorto meesha uu ka codaynaayo.



Qodobka 35^{aad}

WAKIILLADA ASXAABTA QARANKA (GOOBTA JOOGAYAAL) EE DIIWAANGELINTA CODBIXIYAHA

- 1) Xisbi kasta oo siyaasadeed waxa uu magacaabayaa wakiil uu u soo dirsado goob kasta oo diiwaangelineed.
- 2) Wakiilada Xisbiyadu waxa ay hubinayaan in geeddi-socodka diiwaan-gelintu uu waafaqsan yahay sharciga, in aanay dhicin wax kala takoorid ahi, iyo in aan muwaaddin looga reebin diiwaangelinta si sharci-darro ah.
- 3) Wakiillada Xisbiyadu way diiwaangelin karaan wixii cabasho ah ee arrimahaas ku saabsan.
- 4) Shuruudaha lagu soo xulaayo iyo goorta lasoo gudbinaayo Wakiillada Axsaabta waxaa Komishanku kusoo sarayaa Xeer-hoosaad (Regulations).

Qodobka 36^{aad}

HAWSHA MAS'UULKA KOMISHANKA DOORASHOYINKA QARANKA EE GOOBTA DIIWAANGELINTA CODBIXIYAHA

1. Mas'uulku waa inuu waydiiyo codbixiyaha in ay rasmi yihiin xogaha la geliyay foomka muwaadinnimada.
2. Mas'uulku waa inuu xogta sare ku xusan geliyo Foomka diiwaangelinta cod-bixiyaha, isla markaana uu u akhriyo cod-bixiyaha.

3. Cod-bixiyuhu waa in uu saxeexo Foomka diiwaan-gelinta codbixiyaha ama sida kale ee ku xusan Qodobka 8^{aad} ee Xeerkan.



Qodobka 37^{aad}

**SOO SAARISTA IYO DAABACAADDA LIISASKA
CODBIXIYAYAASHA**

Komishanka Doorashooyinka Qaranku, isagoo ku salaynaya liiska magacyada diiwaanka ku jira, waa in uu soo saaro liisas codbixiyayaasha ee lagama-maarmaanka u ah qabsoomidda Doorashada. Si uu u noqdo liis codbixineed oo rasmi ah (**official**). Liis kastaa waa inuu yeeshaa shaambadda Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

Qodobka 38^{aad}

**SOO SAARISTA LIISASKA KAMA DAMBAYSTA
AH EE CODBIXIYAYAASHA**

1. Marka la diiwaangeliyo dhammaan wixii isbeddel ah, waxaa la diyaarinayaa liiska kama dambaysta ah oo noqonaaya liiska uu Komishanka Doorashooyinku amri doono in laga daabaco dhammaan liisaska loo baahan yahay sida ay waajbinayaan Xeerarku.
2. Komishanka Doorashooyinka Qaranka waxaa ku waajib ah in uu siiyo Wasaaradda Arimaha Gudaha iyo Xisbiyada Siyaasadda liiska codbixiyayaasha ee kama danbaysta ah.

Qodobka 39^{aad}

QAYBINTA WARAAQAHA COD-BIXINTA


Komishanku waa inuu siiyo Warqadda Cod-bixinta muwaadin kasta oo isdiwaangaliyay.

CUTUBKA AFRAAD

QODOBBO KALA-DUWAN

Qodobka 40^{aad}

GUDDIGA FARSAMO EE HAWLAHA DIWAAN- GELINTA



- 1) Si loona diyaariyo arrimaha farsamo ee hawlaha diiwaangelinta, isku-duwidna loogu sameeyo hawlaha diiwaangelinta waxa uu komishanku magacaabayaa Guddi Farsamo oo ka kala socda Komishanka Doorashooyinka Heer Qaran, Wasaaradda Arrimaha Gudaha Saddexda Xisbi Qaran.
- 2) Awoodaha iyo waajibaadka Guddida Farsamo waxa uu Komishanka Doorashooyinka Qaranku kusoo saarayaa Xeer-hoosaad (Regulations)

QODDOBKA 41^{AAD}

GACAN KA GAYSASHADA ARRIMAHA NABAD-GELYADA & WACYI- GELINTA EE HAWSHA DIIWAANGELINTA

Komishanka Doorashooyinka Qaranka waxa xilliga hawsha diiwaangelinta gacan ka siinaaya dhinaca Nabad-gelyada Ciidanka Booliska JSL iyaga oo u maraya Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

Qodobka 42^{aad}

GOOB-JOOGAYAASHA

Goobjoogayaasha ama kormeerayaasha caalamiga iyo kuwa maxaliga ah ee hubinaya habsami u socodka hawlaha diwaangelinta cod-bixiyayaasha, waxaa oggolaanaaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka isagoo xagga ammaanka kala kaashanaaya Wasaarada Arrimaha Guddaha.

Qodobka 43^{aad}

WAAJIBAADKA HAY'ADDAHA SHARCI FULINTA

Xukuumadda, Hay'addaha sharci fulinta, Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyo Xisbiyada siyaasiga ahba waxaa xil ka saraan yahay ku dhaqanka iyo meel-marinta Xeerkan.

Qodobka 44^{aad}
CIQAABTA XADGUDUBKA



Qofkasta oo jabiya ama ku xad gudba qodob ama qodobo xeerkan ka mid ah waxaa lagu ciqaab marinayaa:-

1. Qof kasta oo is diiwaangeliya ka badan hal mar ama been ka sheega xogtiisa waxa uu mutaysayanaa ciqaab dhan 3 bilood oo xadhig ah iyo ganaax lacageed oo dhan 1Milyan oo Somaliland Shilin ah.
2. Qof kasta oo isdiiwaangeliya hal mar wax ka badan, waxa uu waayayaa Xaqa Codbixinta ee doorasho illaa inta diiwaangelinta dambe laga gaadhaayo.
3. Qof kasta oo aan ahayn muwaadin Somalilander ah oo isku daya inuu is diiwaan geliyo wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan 5 bilood oo xadhig ah, 2milyan oo ganaax lacageed ah iyo dalka oo laga mustaafiyo marka uu dhameysto mudada xadhiga ah.
4. Mas'uul kasta oo ka shaqeynaya diiwaangalinta kuna xadgudba xeerka wuxuu mutaysanayaa ciqaab dhan 3 illaa 5 sano oo xadhig ah.
5. Qof kasta oo been abuur ku sameeya Kaadhahka Codbixinta ama Diiwaanka Codbixiyeyaasha waxaa mutaysanayaa ciqaab dhan 3 illaa 5 sanno oo xadhig ah.

Qodobka 45^{aad}
SOO SAARIDDA XEER-NIDAAMIYE (POWER TO ISSUE REGULATIONS)

Komishanka Doorashooyinku waxa uu awood u leeyahay in uu soo saaro Xeerhoosaad (Regulations), Xeerka Hab-dhaqanka (Code of Conduct) iyo Awaamiir (Directives) aan ka hor imanayn xeerka.

Qodobka 46^{aad}

DHAQAN-GALKA

Kaabistan iyo wax ka bedelka xeerka Ir 37/2007— Xeerka diiwaagelinta codbixiyeyaasha waxa ay dhaqan-galaysaa marka baarlamaanka JSL ansixiyo, Madaxweynuhu saxeezo, faafinta rasmiga ahna lagusoo saaro.



C/risaaq Siciid Ayaanle

C/raxmaan

Maxamed C/laahi (Cirro)

Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL

Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL



Ref: GAJ/G/RF-26/643/3074

Date: 20/12/2014

GO'AANKA ANSIXINTA MIISAANIYADDA DAWLADDA EE 2015ka

- MARKUU ARKAY: Qodobada **54aad** iyo **55aad** ee Dastuurka Qaranka.
- MARKUU DHEGAYSTAY: Xog-waranka **Wasiirka Wasaaradda Maaliyaddu** Ku itimiyay odoroska miisaaniyadda Dawladda ee **2015da**
- MARKUU DHEGAYSTAY: Xog warankii soo jeedinta iyo talooyinkii Guddi **Hoosaadka Dhaqaalaha** ee Golaha Wakiiladda.
- MARKUU KA DOODAY: Qaybaha kala duwan ee Miisaaniyadda ka kooban tahay.
- MARKUU U CODEEYAY: Ansixinta odoroska **Miisaaniyadda Dawladda** ee sanadka **2015ka** iyo lifaaqyada ku lanmaan kal-fadhigii **26aad** fadhigisi **14aad** ee **15/12/2014** oo ay goob joog ahaayeen **43 Mudane** oo ka mid ah mudanayaasha Golaha Wakiiladda.

WUXUU COD AQLABIYAD AH (39 COD) OO GACANTAAG AH KU
ANSIXIYAY

1. Odooroska miisaaniyadda **Dawlada Dhexe**, **Hay'adaha Madaxa Banaan**, **Dawlada Hoose**, **Dakhliga Deeqaha Caalamiga ah** (Denmark & Britain), ee **2015ka** oo qadarkeedu dhan yahay **1,507,524,137,219 SLSH** (halkiriyaan, shan boqol iyo todoba bilyan, shan boqol afar iyo labatan milyan, boqol todoba iyo sodon kun, laba boqol sagal iyo toban SL shilin).

Website: www.somalilandparliament.net

1. Dawladda Dhexe	1,080,000,000,000
2. Hay'adaha Madaxa Banaan	176,846,392,352
3. Dawladdaha Hoose	164,877,744,867
4. Dakhliga Deeqaha Caalamiga ah	85,800,000,000

2. Lifaayada ku lamaan ee Lagu Ansixiyey Miisaniyada:-

- b. Lifaaqa 1aad** :- Wax ka badalka taciifadaha ee 2015ka
t. Lifaaqa 2aad :- Siyaasada Guud ee Miisaniyada 2015ka

Ansixinta Miisaniyada waxaa ka samusay (saddex Mudane) cid diidayna may jiriin. Gudoomiyuhuna muu codayn sida caadada ah.


Miisaniyadani waxay dhaqan gelayso marka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland soo saaro Digreetada dhaqangelinta.

ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL



C/raxmaan Maxamed C/laahi(Cirro)
Gudoomiyaha Golaha Wakiilada JSL



QAYBTA LABAAD:
XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO
DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA



REPUBLIC OF  SOMALILAND
THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2862/122014

04/12/14

XEER MADAXWEYNE Lr:0412/122014

Cafis Madaxweyne

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, xubintiisa
5aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka
Ciqaabta Guud;

Markuu Tixgeliyey: Codsiga Madax-
dhaqameedka iyo
Odayaasha ka soo jeeda
Deegaanka Maxaabiista.

Wuxuu Go'aansaday

In uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo maxaabiista magacyadoodu hoos ku qoran-yihiin:



1. Cabdillaahi Saalax Jaamac.
2. Siciid Aadan Siciid.
3. Yuusuf Saalax Cabdi.
4. Siciid Salaad Axmed.
5. Idle Axmed Caarshe.
6. Hurre Saalax Axmed.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-2882/122014

23/12/14

XEER MADAXWEYNE Lr:0414/122014

Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka

2015-ka

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee
Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;



Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee
Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiilada,
Go'aan Lr. GW/G/KF-
26/643/2014 ee ku
taariikhaysan 20/12/2014
ee ay ku ansixiyeen
Miisaaniyadda Sannadka
2015-ka ee Dawladda
Dhexe, Hay'adaha Madaxa
Bannaan, Dawladaha
Hoose, Dakhliga Deeqda
Caalamiga ah (Denmark iyo
Britain) iyo Lifaaqyada ku
lammaan;


Wuxuu Soo Saaray

Xeerkan oo lagu baahinayo dhaqan-galka
Miisaaniyad Sannadeedka 2015-ka ee Dawladda
Dhexe, Hay'adaha Madaxa Bannaan, Dawladaha
Hoose, Dakhliga Deeqda Caalamiga ah (Denmark iyo
Britain) iyo Lifaaqyada ku lammaan.

Alla Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SADDEXAAD:
DIGREETOYINKA, WAREEGTOYINKA,
AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA
WASIIRADA, IWM



Jamhuuriyada Somaliland



Republic Of Somaliland

Wasaaradda Beeraha

Ministry of Agriculture

Wasiirka

Ref: WB/XW/Agri/15/454/2014 Taariikh: 10th-December-2014

Ku: Dhamaan Isuduwayaasha W/Beeraha Gobolada iyo Degmooyinka dalka =Fadhigooda
Ku: Dhamaan Maayarada Degmooyinka dalka =Fadhigooda
Ku: Dhamaan Taliyayaasha Qaybaha Booloiska Gobolada dalka =Fadhigooda
Ku: Gudoomiyayaasha Gobolada Dalka =Fadhigooda
Og: Agaasimaha Guud ee W/Beeraha JSL =Hargeysa
Og: Garyaqaanka Guud ee Qaranka =Hargeysa
Og: Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL =Hargeysa
Og: Taliyaha Guud Ee Ciidanka Booliska JSL =Hargeysa
Og: Wasiir ku Xigeenka W/Beeraha JSL =Hargeysa
Og: Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha JSL =Hargeysa
Og: Madaxweynaha JSL =Hargeysa

Ujeedo: Wareegto

Anigoo tix raacaya sharciga lambarkiisu yahay 08/99, ee soo baxay 27/10/99 kaas oo caddaynaya in uu qaranka Jamhuuriyada Somaliland masuul uga yahay dhul beereedka dalka Wasiirka Wasaarada Beeraha, Hadaba:-

- ❖ Markaan arkay in baloodhadii si xawli ah ugu socdaan dhul beereedka dalka.

- ❖ Markaan ogaadey in beryahan dambe ay aad u soo kordhayso khilaaafaadka iyo isqabqabsiga beerehu.
- ❖ Markaan ogaadey in aan laga xerayn shahaadooyinkii beero badan oo la qorsheeyey.
- ❖ Markaan ogaadey in shahaadooyinkii aan la xerayn inay sababeen in dhul beereed kale lagu sheegto.
- ❖ Markaan si weyn uga baaraan degay lana tashaday madaxda wasaarada beeraha, iskuna qanciyeey arimaha kor ku xusan waxaan soo saaray wareegtadan:-
 1. Waa in dawladaha hoose aanay sharciyeyn dhul beereed dambe iyaga oo aan fasax ka helin Wasaarada Beeraha ee Gobolada iyo Degmooyinka.
 2. Waa in Wasaarada Beeraha ee Gobolada iyo Degmooyinku xereeyaan shahaadooyinka beeraha la qorshaynayo.
 3. Waa in Wasaarada Beeraha ee Gobolada iyo Degmooyinku si dhow ula shaqaysaa dawladaha hoose ee dalka si looga hor tago khaladaadkii hore ee dhacay si aanay u soo noqon mar dambe.
 4. Waa in Wasaarada Beeraha ee Gobolada iyo Degmooyinku inay diiwaanka wax soo saarka ka saaraan beeraha la qorsheeyey.
 5. Waa in isuduwayaasha Wasaarada Beeraha ee gobolada iyo degmooyinku joojiyaan beeraha la doonayo in la qorsheeyo ee baal marsan wareegtadan.
 6. Waa in Gudoomiyayaasha Gobolada iyo Taliyayaasha qaybaha Booliska ee dalka si weyn uga qayb qaataan fulinta wareegtadan.

ALLAA MAHAD LEH
(Prof: Faarax Cilmi Maxamuud)
Wasiirka Wasaarada Beeraha

QAYBTA AFRAAD:
AMARADA & GO'AANADA MAAMUL



aJAMHUURIYADDA SOMALILAND
MAXKAMADDA RAFCAANKA GOBOLKA
MAROODI JEEX

MRGMJ/QMRL/50/2014

Date:- 30/11/2014

KU:- IDAACADA RADIO HARGAYSA
KU:- WARGEESYADA MADAXA BANANA
OG:- XAFIISKA GAR-YAQAANKA GUUD
OG:- RAFCAANLE:- CEEBTA FAARAX CALI

Ujeeddo : Qaraar Baafin Rafcaansane :-Nuur Aw
Muxumed Xuseen.

Maxkamadan Rafcaanku:

1. Markay Aragtay: Gal dacwadeedkan sumadiisu sare ku xusan tahay, kana dhexeeya dhinacyada kala ah:

Rafcaanlayaal: Ilma Cabdi Qaalib iyo Hooyo: Ceebla Faarax Cali

Rafcaansane: Nuur Aw Muxumed Xuseen

2. Markay Aragtay: Cabashada af ahaaneed ee rafcaanlayaasha, ee ah rafcaansanaha halanoo baafiyo si dacwada loo dhagaysto.

3. Markay Argatay: Qod 121 xubiintiisa 6aad XHM. Sababaha sare eeku xusan dartood waxay baafinaysaa maxkamadan rafcaanku, Rafcaansanaha ujeedada sare ku xusan , inuu ku yimaado maxkaamadda racfaanka Gobolka Maroodijeex muddo dhan 40 cisho gudahood oo ka bilaamaaysa maalinta warbaahinta dalka laga baahiyo.

Haddaba haddii aad ku imanwaydo muddadaa lagu qabatay, waxaa lagaa qaadi doonaa talaabo sharciga waafaqsan oo la xidhiidha dacwadaada.

Alla Mahad Leh.

SH.Barkhad Isaaq Barre

Garsooraha maxkamada Rafcaanka Gobolka Maroodi jeex.

JAMHUURIYADDA SOMALILAND
MAXKAMADDA RAFCAANKA GOBOLKA
MAROODI JEEX
APPEAL COURT OF HARGEISA

MRGMJ/DML/120/2014

30-11-2014

KU: - Radio Hargeysa

KU: - Dhamaan jaaridada Madaxabanaan iyo kuwa dowliga ah

KU: - Garyaqaanka Guud ee Qaranka Jsl =Hargeysa=

Ujeedo: Baafin Rafcaanle

C/naasir Maxamed Muuse

Maxkamada Racfaanka Gobolka Hargeysa iyada oo xeerinaysa Qodobo121,XHM,waxay baafinaysaa Rafcaanlaha Magaciisu yahay C/nasir Maxamed Muuse inuu maxkamada horteeda ku yimaado mudo 15,ciisho Gudohood ah, oo ka bilaabmaysa maalinta idaacada iyo jaraa,idka madaxa banaan lagu baafiyo.

Sidaa darteed waxaa la farayaa Rafcaanlaha Magaciisu kor u xusan yahay, inuu Maxkamada horteeda ku yimaado mudada Wakhtigaas. Hadii aad ku iman waydana.Waxay Maxkamadu kaa qaadi doontaa talaabo sharciga waafaqsan, oo la xidhiidha arintaada.

Alla Mahad Leh

DR.Cali Suudi Diriiye

Garsooraha Maxkamada Rafcaanka Gobolka M/Jeex=
Hargeysa=

C/casiis Maxamed Muuse

Kaaliyaha Maxkamada Rafcaanka Gobolka M/jeex.

JAMHUURIYADDA



SOMALIILAND

MAXKAMADDA DEGMADA HARGAYSA



Hargaysa District

court

MDH/1775/2014

23/12/14

Ku: - Idaacadda Radio Hargeysa

Ku: - Dhamaan Warbaahinta Madaxa Banaan

Ku: - Maayirka Caasimadda Hargeysa

Ku: - Agaasimaha Waaxda Dhulka ee Dawlada Hoose

Ku: - Taliyaha Saldhiga Dhexe Ee Hargeysa

Ku: - Maayirka Ku Xigeenka Caasimadda Hargeysa

Ku: - Xog hayaha Dawladda Hoose Hargeysa

Ku: - Xafiiska Garyaqaanka Guud

UJ: - Amar Xayiraad Guri Fooq ah oo ay leeyihiin ilma
Aadan Dhamac

Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay: - Arjiga Codsiga ah Ee uu Maxkamadda u soo qortay Qareenka Dacwoodeyaasha ilma Aadan Dhamac Qareen Sh. Jaamac Maxamed Abokor kuna codsanayo in loo xayiro Gurigan Fooqa ah Ee ku yaala Degmada 26juun gaar ahaan ka soo horjeedka fooqa ina afdiinle Cabirkiisu jihooyinkiisu kala yihiin

Bari.....Waddo

Galbeed.....Dhisme

Koonfur.....Waddo

Waqooyi.....Waddo



Gurigaasi oo ku yaala Degmada 26juun Ee Hargeysa ka soo horjeedka fooqa in afdiile)

Maxkamaddu waxay u Cuskatay Xayiraadan Qod: 294, 295, 296 XHM.

Asbaabta sare ku xusan iyo qodobada sharci Ee sare ku xusan Darteed waxay Maxkamadu laga bilaabo maanta 23/12/2014 xayiraad saartay Guriga Fooqa ah ee sare ku xusan Ee ku yaala Degmadda 26juun ee Ee jihooyinkiisuna sare ku xusan yihiin in aan la iibin Karin la rahmi Karin sifo kalana loo badali Karin ilaa amar danbe maxkamadda ka soo baxayo.

ALLAA MAHAD LEH

C/raxmaan Maxamed Mowliid

Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargeysa

Kaaliye: - Khadra Xasan Nuux

JAMHUURIYADDA SOMALILAND REPUBLIC SOMALILAND

MAXKMADDA GOBOLKA HARGEISA REGIONAL COURT HARGEISA

MGH

MGH/DFL/71/2013

23/December/2014

Ku: Idaacada Radio Hargeisa =Hargiesa=

Ku: Wargeysyada Madaxa Banan =Hargiesa=

Og: Xafiiska Garyaqaanka Guud Ee Qaranka JSL
=Hargiesa=

Og: Gudoomiyahah Maxkamada Rafcaanka Gobolka
Hargeisa =Hargiesa=

Og: Gudoomiyaha Maxkamada Gobolka Hargeisa
=Hargiesa=

Og: Gudoomiyaha Degmada Gacan Libaax =Hargiesa=

Og: Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargeisa
=Hargiesa=

Og: Loofuliye: Maxamed Yuusuf Odowaa =Hargiesa=

- Jacfar Axmed Bade
- Sh. Maxamed Ibraahim Nuur
- Maryan Cige Yuusuf

Og: Lagu Fuliye: Ilma Muxumed Warsame =Hargiesa=

Ujeedo: Naado Xaraash Guri

Number: GLMX-T-17-169 Degmada Gacan-Libaax

Maxkamada Gobolka M/jeex:

Markay Aragtay: Gal dacwadeedka Fulinta ah ee sumadiisu iyo dhinac yadiisuba sare ku xusan yihiin

Markay Aragtay: Xayiraada maxkamada Gobolka M/Jeex eek u taariikhaysan 31/05/014

Markay Aragtay: Qodobada 397,400,401 XHM.

Sidaa daraadeed waxay maxkamadu Naadinaysaa xaraashka Guriga sare ku xusan ee ku yaala Degmada Gacal Libaax.



Gurigana oo Cabirkiisu yahay 4.10x7.75Mt Kuna jirto Makhaayada Aamina Muxumed, Leeyihina Lagu Fuliyeyaal Ilmo Muxumed Warsame, Kuna yaala Degmada Gacan-Liibaax Masjid-Jaamac Agtiisa Jihooyinkiisuna yihiin Sidan soo socota:

Waqooyi.....Wado

BariDhisme

Koonfur Dhisme

Gal Beed Dhisme

Hadaba cidii danaynaysa Naadinta xaraashkan waxay kala xidhiidhi karaan Xafiiska Kaaliyaha sare ee Maxkamada Gobolka M/Jeex – Hargiesa Iyo Kaaliyaha Maxkamada Gobolka Hargiesa C/salaam Muuse Ducaale 063-4403220

Alla Mahad Leh

((Yaxye Cali Idiris))

Garsoore Maxkamada Gobolka M/Jeex

=Hargaysa=

JAMHUURIYADDA SOMALILAND REPUBLIC SOMALILAND

MAXKMADA GEBOLKA HARGEISA REGIONAL COURT HARGEISA

Ku: Idaacada Radio Hargeisa

=Hargiesa=

Ku: Wargeysyada Madaxa Banan

=Hargiesa=

Og: Xafiiska Garyaqaanka Guud Ee Qaranka JSL

=Hargiesa=

Og: Gudoomiyahah Maxkamada Rafcaanka Gobolka

Hargeisa

=Hargiesa=

Og: Gudoomiyaha Maxkamada Gobolak Hargeisa

=Hargiesa=

Og: Gudoomiyaha Degmada Gacan Libaax

=Hargiesa=

Og: Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargeisa

=Hargiesa=

Og: Loofuliye: Maxamed Yuusuf Odowaa

=Hargiesa=

- Jacfar Axmed Bade
- Sh.Maxamed Ibraahim Nuur
- Maryan Cige Yuusuf

Og: Lagu Fuliye: Ilma Muxumed Warsame

=Hargiesa=

Ujeedo: Naado Xaraash Guri

Number : GLMX-T-17-149 Degmada Gacan-Libaax

Maxkamada Gobolka M/jeex:

Markay Aragtay:

Gal dacwadeedka Fulinta ah ee sumadiisu iyo dhinac yadiisuba sare ku xusan yihiin

Markay Aragtay:

Xayiraada maxkamada
Gobolka M/Jeex ee u
taariikhaysan 31/05/014

Markay Aragtay:

Qodobada 397,400-401 XHM.

Sidaa daraadeed waxay maxkamadu Naadinaysaa xaraashka Guriga sare ku xusan ee ku yaala Degmada Gacal Libaax

Gurigana oo Cabirkiisu yahay 3.50X7.50Mt Kuna jirto Ro iise Iyo Doobi, Leeyihiina Lagu Fuliyeaal Caaqilada Ilmo Yuusuf Warsame, Kuna yaala Degmada Gacan-Liibaax Masjid-Jaamac Agtiisa Jihooyinkiisuna yihiin Sidan soo socota:

Waqooyi.....Dhisme

BariDhisme

Koonfur Wado

Gal Beed Dhisme

Hadaba cidii danaynaysa Naadinta xaraashkan waxay kala xidhiidhi karaan Xafiiska Kaaliyaha sare ee Maxkamada Gobolka M/Jeex – Hargiesa Iyo Kaaliyaha Maxkamada Gobolka Hargiesa C/salaam Muuse Ducaale 063-4403220.

Alla Mahad Leh

((Yaxye Cali Idiris))

Garsoore Maxkamada Gobolka M/Jeex

=Hargaysa=

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/193/2014.

07/12/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Caddeyn Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha dalka (Sole Proprietorship).

Markuu Arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay:- Qodobka 502aad ee Xeerka Madaniga.

Markuu Arkay: - Ogolaanshaha Wasaaradad Ganacsiga JSL ee WGM-AG-PCA-176/014.

Markuu Arkay:- Xeerka Shirkada ku magacaaban GADHYARE CONSTRUCTION & CONTRACTING COMPANY.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay Shirkaddan ku Magacaaban GADHYARE

CONSTRUCTION & CONTRACTING COMPANY,
Astaanteeduna tahay: - (Dhismayaaal si daba yaala),
shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction and
Contracting), Xarunteeduna tahay magaalada Hargeisa,
laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 07/12/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**
XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/196/2014.

08/12/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda
Somaliland oo uu xil saaray diiwaan gelinta shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobka 502aad ee Xeerka
Madaniga.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkad ku Magacaaban
EAST AFRICA SERVICE COMPANY
(EASTCO).

Markuu arkay: - Saxeexa Mulkiilaha Shirkaddu u
saxeexay.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay Shirkan ku Magacaaban EAST AFRICA SERVICE COMPANY (EASTCO), shaqadeedu tahay Bixinta adeegyada (Logistics and Procurement), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa , laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 8/12/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/195/2014.

10/12/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diwaan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray Diwaan Gelinta Shirkadaha;-

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SMART CONSTRUCTION AND CONTRACTING, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 (Company Act of Somaliland) saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan tahay Shirkada Magaceedu yahay **SMART CONSTRUCTION AND CONTRACTING, Astaanteeduna tahay:-**(Dhisme Guri oo u ku hoos qoran yahay Magaca Shirkadu) shaqadeeduna tahay dhismaha (Construction and Contracting), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 10/12/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD 

XIG/JSL/194/2014.

11/12/2014

Hargeysa.

KU: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin TV

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Jamhuuriyadda Somaliland oo uu xil saaray diiwaan Gelinta Saxaafada dalka;-

Markuu arkay: - Qodobka 32aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Markuu arkay: - Qodobka 6aad iyo 7aad ee Xeerka Saxaafadda Xeer Lam.27/2004.

Markuu arkay: - Warqada Ogolaanshaha ee Wasaaradda Warfaafinta sumadeedu tahay WWW/XWK/3805/2014, Kuna taariikhaysan 20/05/2014 oo aay ku ogolaatay in loo diiwaan geliyo Tv-ga Kalsan.

Markuu arkay: - Cosiga uu soo qortay Wakiilka TV-ga Kalsan, kuna codsanayaa in loo Ogolaado in ay Somaliland ku yeeshaan Xarun.

Wuxuu Ogolaaday.

In Tv-ga Kalsan oo ka diiwan gashan Dalka Ingiriiska (Uk) uu laan ku yeesho Somaliland, Xarunteedu tahay Hargeysa oo uu wakiil uga yahay Dr Aadan Ismaaciil Xasan



Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

TIX:- XIG/JSL/197/2014.

13/12/2014

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay , SAVANA ENERY COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay:-

In ay Saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugin yihiin.



Markuu arkay:-

Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga Diiwaan gashan Tahay Shirkadda magaceedu yahay, SAVANA ENERY COMPANY, Astaanteeduna tahay:- (Sawir Booyad Shidaal), shaqadeedu tahay soo Dejinta Shidaalka (Fuel Importation), xaranteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 13/12/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/198/2014


14/12/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeeddo: - Caddeyn Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saran diiwaangalinta Shirikadaha dalka (Sole Proprietorship).



Markuu arkay: - Qodobka 11aad ee Xeerka Shirikadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan Geliso Shirikadaha.

Markuu arkay: - Qodobka 502aad ee Xeerka Madaniga.

Markuu arkay: - Ogolaanshaha Wasaaradad Ganacsiga JSL ee WGM-AG-PCA-179/014.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkada ku magacaaban NUR YARE GROUP LTD.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkan ku magacaaban NUR YARE GROUP LTD, astaanteeduna tahay: - (Xidig), shaqadeeduna tahay Ganacsi Guud (General Trading), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taariikhdu tahay 13/12/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



TIX: - XIG/JSL/199/2014

15/12/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeeddo: - Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AL-HAASHIMI GENERAL TRADING COMPANY, oo ay ku Cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - in ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka

11aad xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada ku magaceedu yahay, AL-HAASHIMI GENERAL TRADING COMPANY, astaanteeduna tahay: - (Map-ka Aduunka oo Magaca shirkadu ku hoos Qoran yahay) shaqadeedu tahay soo Dejinta Bagaashka (Importer), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 15/12/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/200/2014

15/12/2014


Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeedo: - Caddeyn Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha dalka (Sole Proprietorship).

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha



Markuu Arkay: - Qodobka 502aad ee Xeerka Madaniga.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkada ku magacaaban NUURA CONSTRUCTION COMPANY.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada ku magaceedu yahay, NUURA CONSTRUCTION COMPANY, shaqadeedu tahay: (dhismayaal uu ku hoos qoran yahay Magaca Shirkadu) shaqadeeduna tahay (Construction) xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taarikhdu tahay 15/12/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/201/2014


18/12/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeedo: - Diiwaan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerIlaainta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwaan Gelinta Shirkadaha



Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu Arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SEVEN-STARs CONSTRUCTION AND CONSULTING COMPANY, oo ay ku Cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - In ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada ku magaceedu yahay, SEVEN-STARs CONSTRUCTION AND CONSULTING COMPANY, astaanteeduna tahay: - (Xidig uu magaca shirkadu ku hoos qoran yahay) shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaalada

Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay
18/10/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)



Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/203/2014

21/12/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.


Ujeedo:- Diiwaan Galin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Jamhuuriyadda
Somaliland oo u xil saran diiwaangalinta shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobka 11aad ee Xeerka
Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya
Xafiiska Xeer ilaalinta Guud in ay
Diiwan Geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaaceedu
yahay, SAHAL TRANSPORTATION
AND LOGISTICS (SAHAL TRANS), oo
ay ku cad Qodobka 11aad (2) (A)
SOMALILAND COMPANY LAW.

Markuu arkay: - Inay saamiga shirkada waafaqsan yihiin xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.



Markuu Arkay: - Saxeexa Saamilayda shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer – Shirkadaha.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay SAHAL TRANSPORTATION AND LOGISTICS, (SAHAL TRANS) Astaanteeduna tahay: (Magaaca shirkada) shaqadeedua tahay Bixinta Adeega Socdaalka (Passenger and Percale Delivery Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taariikhdu tahay 21/12/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND


XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/204/2014

18/12/2014

Hargeysa.



Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeedo:- Caddeyn Diiwaan Galin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saran diiwaangalinta shirkadaha dalka (**Sole Proprietorship**).

Markuu arkay: - Qodobka 11aad ee Xeerka Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer ilaalinta Guud in ay Diiwan Geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobka 502aad ee Xeerka Madaniga.

Markuu arkay: - Oglaanshaha Wasaaradada Ganagsiga JSL ee WGM-AG-PCA-182/014.

Markuu Arkay: - Xeerka shirkada ku magacaaban GSK GROUP SOMALILAND COMPANY.

Wuxuu Caddeynayaa.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkan ku magacaaban GSK GROUP SOMALILAND COMPANY, Astaanteeduna tahay, (Magaca shirkada oo la soo Gaabiyey GSK Group), shaqadeedua tahay Bixinta Adeega Maamul (Management skill), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taariikhdu tahay 18/12/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/205/2014

21/12/2014

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khusayso.

Ujeedo:- Diiwaan Galin Shirkadeed.


Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saran diiwaangalinta shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobka 11aad ee Xeerka Shirkadaha, kaas oo awood u siinaya Xafiiska Xeer ilaalinta Guud in ay Diiwan Geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaaceedu yahay, DENHAN INTERNATIONAL COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (A) SOMALILAND COMPANY LAW.

Markuu arkay: - Inay saamiga shirkaddu waafaqsan yihiin xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu Arkay: - Saxeexa Saamilayda shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.



Wuxuu Caddeynayaa.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay DENHAN INTERNATIONAL COMPANY,, Astaanteeduna tahay, (Kontinar), shaqadeeduna tahay soo Dejinta Allaabooyinka (Import), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taariikhdu tahay 21/12/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka